

CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Inay ku noolaadaan badqab

Waa masuuliyad saaran dadka waaweyn inay kaa ilaaliyaan rabshadaha iyo dagaalka. Qof na looma ogolo inuu wax ku yeeleeyo.

“Jinsiyada waa in aysan muhiim ahayn: dhamaanteen waxaan nahay dad.”

“Inay ku noolaadan badqab waxay ka macnaysan tahay inaad banaanka u bixi karto oo aad aadi karto hawlahaaga welwel la'aan.”



CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Inay noqdaan waxa ay rabaan oo loo dhaqmo si siman

Waa inaan laguula dhaqmin si ka xun sida dadka kale loola dhaqmo sababtoo ah sida aad u egtahay, goobta aad ka timid, luuqada aad ku hadasho, diinta ama waxa aad aaminsan tahay. Waa inaan laguula dhaqmin si xun sababtoo ah waxaad tahay magangalyo doon ama qaxooti. U sheeg qof hadii lagu takooro.

Xuquuqda Caruurta

Dalalka dunidu waxay si wada jir ah ugu heshiiyeen xuquuqda ilmaha ee ku jira heshiiska Qaramada Midooday ee Xuquuqda Caruurta, kaas oo ay Finland go'aamisay in la ilaaliyo. Dadka waaweyni waa inay xaqiijiyaan in sidoo kale la ixtiraamo xuquuqda caruurta Finland ku timid qaxootinimo. Marka la gaarayo go'aano khuseeya ilmaha, danta ugu wanaagsan ee ilmaha waa inay markasta noqotaa tixgelinta koobaad.

Qof kasta oo ka yar 18 sano waa ilmo

Heshiiska Qaramada Midooday ee ku Saabsan Xuquuqda Ilmaha



Yaa ku daryeeli kara?

“Walaalkay weyn ayaa i daryeela; anin waxaan daryeela walaashay iga yar.”
“Hooyo iyo aabo. Laakiin waalidku nama ilaalin karaan marka aan dugsiga joogno.”
“Macalimiinta ayaa nagu daryeela dugsiga.”

CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Helitaanka daryeel iyo feejignaan

Waxaad xaq u leedahay inaad la noolaato waalidkaaga haddii gurigaagu yahay meel wanaagsan oo badqab leh. Haddii sababo jira awgood waalidkaa aanay ku daryeeli karin, dadka waaweyn ee kale ayaa hubin doona in lagu daryeelo. Waxaad xaq u leedahay daryeel caafimaad.



CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Inaad u ciyaarto, wakhtiga firaaqada iyo nasasho hesho

Dadka waaweyni waxay u baahan yihiin inay hubiyaan inaad wakhti u haysid asasho, ciyaar, hiwaayad iyo waqti la qaadashada asxaabta.

“Haddii aan maamule ka noqon lahaa xarunta soo dhowaynta, waxa aan xarunta u samayn lahaa alaabta ay ku ciyaaraan.”
“Hooyo iyo aabe waxay i geeyaan hiwaayadahayga sadex jeer todobaadkii.”

CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Si aad uu wax u barto oo uu u xaadiro dugsiga

Waxaad xaq u leedahay inaad lacag la'aan ku dhigato dugsiga iyo inaad hesho taageerada waxbarashadaada. Marka dugsiga la joogo, waxaad ku baran kartaa waxyaabo cusub iyo xirfado nololaha muhiimka u ah, sida ixtiraamka dadka kale, dulqaadka iyo ixtiraamka deegaanka. Waxaad baran doontaa xuquuqda aadanaha, dhaqamada kala duwan iyo sinaanta. Waxa kale oo aad xaq u leedahay dhaqankaaga, diintaada iyo luuqadaada.

CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Inay ogaadaan oo ay helaan macluumaadformation

Waxaad ka raadin kartaa macluumaadka mawduucyada ku xiisaynaya kheyraad iyo ilo kale. Si kastaba ha ahaatee, waa waajibbaadka dadka waaweyn inay kaa ilaaliyaan macluumaadka taas oo waxyeelo leh. Waxaa laga yaabaa, tusaale ahaan, inay xadidaan isticmaalkaaga internetka ama ay kaa mamnuucaan inaad gasho internetka ama daawashada barnaamijka telefeeshinka. Dadka waaweyni ma akhriyi karaan fariimaha aad dirtay ama heshay ogolaanshahaaga la'aanteed. Haddii ay aaminsan yihiin in fariimahaasi ay waxyeelo kuu geysan karaan oo ay rabaan inay arkaan, kala hadal.

“Mararka qaar waxaan dareemaa cadaadis si aan uga gaaro dhibco wanaagsan dugsiga oo aan ugu faano guriga.”
“Xirfadahayga luuqad ahaaneed waxay si degdeg ah u kobceen mar aan isku fasalka la dhigan jiray Finns.”

“Hooyaday waxay kormeertaa isticmaalkayga baraha bulshada iyada oo adeegsanaysa Family Link.”
“Waalidkaygu waxay iga qaadaan talefoonka inta lagu jiro todobaad dugsiga jiro.”
“Waxaa la ii ogol yahay inaan ku ciyaaro talefoonkayga hal saac markiiba.”

“Mararka qaar waxaan leenahay dood qoys ku saabsan, sheeg, ilaa intee ayaan maqnaan kartaa banaanka.”

“Haddii caruurta loo ogolaado inay sheegaan fikradahooda, dunidu waxay noqon doontaa goob ka wanaagsan.”

CARUURTA WAXAY XAQ U LEEYIHIIN

Inay soo bandhigaan fikradahooda iyo in la dhagaysto

Marka dadka waaweyni ay go'aan ka gaaraan arimaha khuseeya caruurta, waxay u baahan yihiin inay ogaadaan waxa adiga kuu fiican oo ay kaala hadlaan. Waxaad xaq u leedahay inaad soo bandhigto ra'yigaaga, laakiin uma baahnid haddii aadan rabin. Waxaad uga fikirsi kartaa oo aad rumaysan kartaa si kasta oo aad rabto.

